

Xaashida Talada Badqabka Nadiifiyeyaasha

Talooyin caafimaad oo taxane iyo badqab ahaaneed si looga hortago dhaawacyada shaqada la xiriira ee warshadaha nadaafadda



Ogaaw calaamadaha khatartaada!

Xagaaga 2024

Jaangooyinka Isgaadhsiinta Khatarta ([Hazard Communication Standard, HCS](#)) ee Maamulka Badbaadada Shaqada iyo Caafimaadka (Occupational Safety and Health Administration, OSHA) waa calaamado digniin ah oo looga baahan yahay in lagu dhejiyo sumadaha alaabada kiimikaad si ay uga caawiyaan isticmaalayaasha iney uga digaan khataro gaar ah. Kiimikooyin kala duwan ayaa laga yaabaa inay lahaadan calaamado khatareed oo kala duwan. Kala hadal kormeerahaaga wixii ku saabsan qalabka ilaalinta shakhsi ahaaneed ee aad u baahan karto (sida maaskarooyinka, gacmo-gashiyada, ama ookiyaalayaasha indhaha) - iyo sida ugu wanaagsan ee si badbaado leh loogu shaqeeyo. Halkan waxaa ku qoran qaar ka mid ah kuwa ugu caansan:



Laf-Madax iyo Lafo Isku-tallaab Loo-dhigay

Sawirkan waxa uu ka dhigan yahay in kiimikadani ay keeni karto waxyeelo aad u daran iyo saameyno daran si degdeg ah (sunta dara), oo ay ku jirto keenida **dhimasho**.



Holac

Sawirkan macnihiisa waa in walax ay sababi karto ama ay qabsan karto dab - waa mid guban karta ama waxay bixin kartaa kulayl ama gaas guban kara.



Khatarta Caafimaad ee Aadanaha -

Sawirkaani macnihiisu waa in kiimiko ay waxyeelo u geysan karto caafimaadkaaga, gudaha muddo ka dib ama isla markiiba. Tani waxay ka dhigan tahay inay sababi karto kansar, dhaawacdo awooddaada inaad ilmo dhasho, ama ay kugu sababto saameyn kale oo sun ah.



Daxaleysiga

Sawirkan macnihiisu waa in kiimiko gubi karto ama waxyeeyn karto maqaarkaaga ama indhahaaga. Walxahani waxay sababi karaan gubasho kiimikaad waxayna waxyeeyn karaan birta.



Calaamatul Cajaa'ib

Sawirkan macnihiisu waxa weeye in kiimikadu ay dhibaato ku keeni karto maqaarkaaga ama neefsashadaada, ama ay kugu keeni karto waxyeelooyinka kale ee halista ah (qaar ayaa laga yaabaa inay soo if-baxaan muddo ka dib). Kiimikooyinkani waa kuwa xajiimo jidh ku keena ama dareenka-kiciya.

Waxaa Loogu Talagalay Shaqaalaha:

- Weydiiso kormeerahaaga qalabka ilaalinta shakhsi ahaaneed.
- U sheeg kormeerahaaga oo [raadso daryeel caafimaad haddii aad dareento fiicnaan la'aan ka dib markaad ku isticmaasho kiimikooyin goobta shaqada](#)

Waxaa Loogu Talagalay Loo shaqeeyayaasha:

- Loo-shaqeeyayaashu waa inay ku hayaan barnaamij ka-warbixiya khatarta oo qoran gudaha goob kasta oo shaqo. Loo-shaqeeyayaashu waa inay xaqiijiyaan in weel kasta si habboon loogu summadeeyay ama loo calaamadeeyay si habboon, oo ayna siiyaan shaqaalaha macluumaad gaar ah oo ku saabsan khataraha jireed iyo kuwa caafimaadeed ee kiimiko kasta oo khatar ah. ([Chapter 296-901 WAC Safety Standards for Hazard Communication – L&I](#)).
- Summadaha badeecooyinka kiimikada ah waa inay sidoo kale ku jiraan "bayaanada taxaddarka" kuwaas oo ah digniino iyo macluumaad ku saabsan sida si badbaado leh loogu isticmaalo oona loo qubo kiimikooyinkan, oo ay ku jiraan tillaabooyinka la qaado si loo yareeyo khatar kastoo caafimaadka.